

Qofka guri kiro ah degan

Waa wax faa'iido leh in xubin laga ahaadaa

Maxaanu rabnaa

Waxaan rabnaa kirooyin cadaalad ku salaysan. Xuquuqda kireysashadu waa inay lahaato shuruudo la mid ah kuwa qaababka kale ee deganaanshaha guryaha oo aan lagu culaysin cashuur iyo khidmad xaqdarro ah.

Waxay Iswiidhan u baahan tahay guryo badan oo xuquuqda kireysiga, oo cabir-koodu/qiyaastoodu kala duwan tahay kuwaas oo dadka qaarba heerarka nolosha ay kaga sugar yihiin ku haboon. Meelo badan oo ay guryaha la degganyahay ka dhisanyihiin ayaa duugoobay oo in dib loo habeeyo u baahan.

Waxay dadka oo dhami xaq u leeyihiin inay ku noolaadaan meel fiican iyagoo kiro macquul ah bixinaaya.

Xubinnimadaada isticmaal

Gorgortanka ayaanu maareynaa iyadoo aanu ka talobixino arimaha kirada khu-seeya. Waaanu bixinaa taageero sharci iyadoo aanu ku caawineyno haddii aad rabto inaad ka qeybqaadato arrimaha guryaha ee meesha aad degan tahay khuseeya. Waaad heli doontaa joornaalka xubnaha ee Hem & Hyra, adeeg bogga internetka, dalabyada xubnaha iyo wax ka badan.

Isticmaal xubinnimadaada Ururka Kiraystayaasha. Waligaa haka waaban haddii aad wax deganaanshaha ku saabsan is weydiineyso! Soo wac 0771-443 443 ama booqo hyresgastforeningen.se.

Join the Swedish Union of Tenants

Som medlem i Hyresgästföreningen får du många fördelar och stor möjlighet att påverka ditt boende.

Waaad macluumaad dheeraad ah ka helaysaa. hyresgastforeningen.se iyo Hem & Hyra.



Waxa uu Ururka kiraystayaashu haystaa wax nus milyan xubnood ka badan. Waxay taasi na siinaysaa fursad ka fiican oo aanu siyaasadda guriyeenta ee Iswi-idhan ugu saameyn karno. Taasi waxay sidoo kale ka dhigan tahay inaanu hayno urur khibrad iyo karti leh oo aad waxkasta oo deganaanshahaaga khuseeya weydiin karto.

Waxa intaas dheer inaad heli doonto dalabyo xubnaha loo soo bandhigo oo aad u wanaagsan kuwaas oo alaaboo iyo adeegyo kala duwanba leh. Laga bilaabo caymisyo ilaa tigidhada shineemada.

Ururka kirey-stayaasha ayaa sharciga kor iyo hoosba wada garanaaya

Amniga iyo saameyn ta

Iyadoo uu Ururka Kiraystayaashu ku taageeraayo ayaad ka qeybqaadan kartaa oo aad waxyaalaha ugu badan ee hoygaaga khuseeya saameyn kartaa. Wax kasta laga bilaabo dhibaatooyinka qolka dhar-dhigista ilaa iyo haddi heshiiska kireysiga la joojiyo. Dhibaatooyinka yaryar ayay-nu toos telefoonka ugu wada xallineynaa. Laakiin haddii loo baahdo, ayaanu maxkamada kugu matali karnaa.

Iyadoo qofka aad tahay ku xidhan ayay su'aalaha kala duwan ee kireysiga ku saabsan micno kala duwan kuu leeyihiin. Dadka qaar ayay muhiim u tahay inay gurigood ku raaxeystaan uun, halka uu kuwa kalena amaanku muhimmad weyn u leeyahay. Haddii aad carruur yaryar leedahay ayaa laga yaabaa inay goob wanaagsan oo lagu ciyaaro oo xadiiqada ku taalaa ay muhiim kuu tahay.



Hiyaad kirada saxda ah bixisaa?

Waa inay kiradu u qalantaa heerka iyo tayada guriga. Mid ka mid ah shaqadaya ugu muhiimsan waa gorgortanka kirada. Iyo si mulkiila-ha gurigu looga dhigo inuu guryaha dayactiro oo uu hagaajiyo.

Miyaad xuquuqdaada taqaanaa?

Kireyste ahaan ayaad xuquuq leedahay. Haddii aad rabto inaad waxay kuwaasi yihiin ogaato ayaad heli doontaa talobixin telefoonka ah ama iyadoo lagula kulmo. Ama isticmaal adeegga ururka kireystayaasha ee ku jira hyresgastforeningen.se.

Miyaad rabtaa inaad arimaha guryaha wax dheeraad ah ka ogaato?

Waxaanu la soconaa wax kasta oo guri kiraynta la xiriira. Waxaad badankooda ka heli doontaa joornaalka xubnaha ee Hem & Hyra iyo bogga internetka.

**Miyaad doonaysaa inaad meesha aad
degan tahay wax ka bedesho?**

Waxaad adigoo haysta taageerada Ururka Kiraystayaasha ka sii wanaajin kartaa guryaha aagaaga aad degan tahay.

Haddii aanad xubin ahayn ayaad helaysaa inaad...

- adigu xuquuqdaada soo ogaato
- adigu arimaha sharci ahaaneed ee kala duwan is matasho
- adigu kharashka qareenka iska bixiso
- adigu kaligaa kireeyaha/mulkiilaha guriga la heshiiso.

Hiyaad talobixin sharci-ga ah u baahan tahay?

Waxay Ururka kiraystayaashu haystaan qareeno iyo maareeyayaal sharciga kirada kor iyo hoosba yaqaana. Wxaanu sannad kasta taageero iyo adeeg siinaa kumanaan xubno ah.

Ururka kiraystayaasha ee internedka

Waxaad bogga internetka ee ururka kiraystayaasha ka helaysaa jawaabaha su'aalo badan oo deganaashaha hoy-gaaga ku saabsan. Waxaad jadwalka ka arkaysaa waxa meesha aad degan tahay ka dhacaaya. Haddii aad daney-nayso inaad meesha aad ku nooshahay ka qeybqaadato ayaad heli doontaa talooyin iyo tusaaleyaal sida aad taas u samayn karto ku saabsan.

